



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Golaha Shacabka

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**  
**KU SAABSAN**  
**SAMAYNTA CURAARTA DARYEELKA DEGDEG AH EE**  
**XILDHIBAANADA**

Muqdisho, 8<sup>da</sup> Diseembar 2013



[Handwritten signature]

**GOLAHA SHACABKA:**

**Markuu arkay:** dhibaatooyiinka soo foodsaara qoysaska iyo ubadka Xildhibaanada geeriyooda;

**Markuu ka baaraandegay:** duruufaha dhaqaalahaynta kooban ee Miisaaniyadda Baarlamaanka;

**Asaga oo Garwaaqsan:** in qoysaska Xildhibaanada geeridooday loo fidiyo daryeel degdeg ah oo ka daboola baahida hore ee aasaasiga ah;

**Wuxuu:** kalfadhiga 3-aad kulankiisa 37-aad ee 8 Diseembar 2013 wuxuu si wadaroggol ku guddoonsaday sida soo socota:

**Qodobka 1aad:**

Sameynta curaar lacageed oo lagu daryeello baahida hore aasaasiga ah ee qoysaska Xildhibaanada geeriyooda,

**Qodobka 2aad:**

In gunno bileedda Xildhibaan walba laga jaro deeq dhan \$100 (*Boqol doolar*) bil walba laguna shubo xisaab bankiyeed u gaar ah daryeelka degdega ah ee qoysaska Xildhibaanada geeriyooday.

**Qodobka 3aad:**

In Xildhibaanadii geeriyooda qoyskiisa laga siiyo curaartan \$30,000 (Soddon kun oo doolar).

**Qodobka 4aad:**


Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka waxaa la farayaa:

- a) In uu Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ka furo xisaab u gaar ah Curaarta Daryeelka oo ay Saxiixa wax ka soo saarideedu yeeshan ugu yaraan labo qof oo ka mid ah hal Guddoomiye ku-xigeen Golaha Shacabka, Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka iyo Agaasimaha waaxda Maamulka;

- b) In bankiga ku amro in si toos ah Xildhibaanada looga jaro bil walba lacagta ku xusan Qodobka 2aad ee qaraarkan lagu shubo xisaabta curaarta;
- c) In bil walba xaaladda dhaqdhaqaaqa xisaabta curaarta ku wageliyo Xildhibaanada Golaha Shacabka iyo xisaabiyaha Golaha;

**Qodobka 5aad:**

Haddii uusan Golaha Shacabka si kale u go'aansan, lacagta ku harsanaata xisaabta curaarta ka hor dhammaadka Madasha Sharcidejinta ee ku beegan Seteembar 2016 waxaa si siman loogu qeybinayaa tirada guud ee xubnaha Golaha.

  
M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

